PUBLIC HOUSING
GURYAHA DADWEYNAHA

SOMALI

Xukuumadda Victoria waxay bixisaa guryo dadweyne oo xadidan oo la siiyo dadka dhakhligoodu hooseeyo. Guryaha dadweynaha waxaa laga qoondeeya oo laga maamulaa Xafiiska Guriyeynta. Buuggaan Tilmaame-ha ah waxaa ku yaal xog lagu caawinayo soo-galootiyada cusub ee Victoria siday u heli lahaayeen guryaha dadweynaha sida ugu dhakhsaha badan.

Buuggaan Tilmaame-ha ah waxaa kaloo ku yaal xog ku saabsan hay'adaha bulshada kuwaas oo kaa caawin kara sidii aad u codsan lahayd guryaha dadweynaha (eeg halka ay ku taal **Kumaa Iga caawin kara?**). Waxaan kugula talinaynaa inaad la xirriirto hay'adahaas. Hay'adahaasi waxay aqoon badan u leeyihiin arrimaha la xirriira codsiyada guryaha dadweynaha waxayna diyaar u yihiin inay ku caawiyaan. Waa lacag la'aan, qarsoodi ah, kana madax-bannaan Xafiiska Guriyeynta.

Kumaa codsan kara Guryaha Dadweynaha?

Haddii aad doonayso inaad codsato guryaha dadweynaha, waxaad u baahan doontaa inaad siiso Xafiiska Guriyeynta dokumantiyada caddaynaya

- inaad tahay muwaadin Australia ah, degane joogto ah ama inaad haysato fiisada magan-gelinta ku-meel-gaarka ah.
- inaad hadda ku nooshahay Victoria.
- inaadan lahayn guri, yunid ama falaat.
- inaad leedahay dhakhli kuu gaar ah oo aan ka badanayn xadka loo gooyey.
  (guud ahaan, waad u xaq leedahay haddii uu dhakhligaagu hooseeyo oo aad qaadato lacagaha Centrelink).
- haddii uu kugu soo damaanad qaaday qoyskiinu inaad Australia timaado, oo heshiiskii damaanad-qaadku uu dhammaaday ama uu u burburay khilaaf awgiis.
- inaad dib-u-bixisay ama aad dib-ka-bixinayso lacag ay kugu lahaayeen Xafiiska Guriyeynta (tusaale, inaad dib-u-bixinayso lacagtii uu Xafiiska Guriyeyntu kugu amaahiyey mashruuca Bond Loan Scheme).

Sidee baan u codsan karaa Guryaha Dadweynaha?

Si aad u codsato guryaha dadweynaha, waxaad u baahan doontaa inaad Xafiiska Guriyeynta ka soo qaadato foomka codsiga. Xafiiska Guriyeynta wuxuu xafiisyo ku leeyahay Victoria oo dhan. Si aad u hesho xafiiska kuugu dhow, waxaad ka hoos eegta meesha ay ku qoran tahay Human Services/Housing Services Division ee Buugga Taleefoonada A-K White Pages telephone directory.

Waxaa jira afar nooc ee foomamka codsiga guryaha dadweynaha - mid kastana waxaa loogu talo-galay mid ka mid ah qaybaha hoos ku faahfaahsan. Waad codsan kartaa hal qayb wax ka badan, ayadoo ku xiran duruufahaaga. Xafiiska Guriyeynta iyo dhowr ka mid ah hay'adaha bulshada ayaa ku caawin kara haddii aadan garanayn foomka codsiga (eeg halka ay ku taal Kumaa Iga caawin kara?).

Sidee buu Xafiiska Guriyeyntu u qiimaynayaa baahidayda?

Xafiiska Guriyeynta wuxuu qiimayn doonaa baahidaada iyo duruufahaagaba, wuxuuna codsigaaga ku darayaa labada liisaska-sugidda midkood oo kala ah: Sug-Tookada (Wait-Turn) ama Guriyeynta degdegga ah (Early Housing).

Sug-Tookada (Wait-Turn)

Wait-Turn (Sug-Tookada) waa liiska sugidda guud ee guryaha dadweynaha. Muddada sugidda ee codsiga noocaan ah waa dheer yahay.

Guriyeynta degdegga ah (Early Housing)

Guriyeynta Degdegga ah (Early Housing) waa hab degdeg ah oo lagu heli karo guryaha dadweynaha, in kastoo lagaa rabo inaad muujiso baahi degdeg ah oo aad u qabto guri. Waqtiga sugiddu wuxuu ku xiran yahay arrimaha ay ka midka yihiin tirada qolalka aad u baahan tahay iyo meesha aad doonayso inaad degto.

Waxaa jira saddex nooc ee qaybaha Guriyeynta Degdegga ah (Early Housing): Guri-la'aanta Joogtada ah (Recurring Homelessness), Hooyga-la-Kaabo (Supported Housing) iyo Baahida Guriyeynta Gaarka ah (Special Housing Needs).

Guri-la'aanta Joogtada ah (Recurring Homelessness)

Guud ahaan, si aad ugu xaq yeelato Qaybta Guri-la'aanta Joogtada ah (Recurring Homelessness) waa inaad leedahay taariikh guri la'aan (darbi-jiifnimo) ama inaad khatar ugu jirto inaad noqoto darbi-jiif. Waa inaad kaloo ku nooshahay hooy uu maamulo Maamulaha Guryaha Meel-dhaxmeedka ah (Transitional Housing Manager) ama hay'adda hooyga waqtiga shidada. Haddii xaaladdaadu sidaan oo kale ay tahay, Maamulahaaga Guryaha Meel-dhaxmeedka ah ayaa kaa caawin kara sidaad u codsan lahayd guryaha dadweynaha.

Hooyga la-Kaabo (Supported Accommodation)

Guud ahaan, si aad ugu xaq yeelato Qaybta Hooyga La-kaabo waxaad u baahan tahay inaad muujiso baahida aad u qabto taageerid shakhsiyeed oo muhiim ah, guri leh dib-u-habaynta curyaanimada, ama guri leh meel uu mari karo gaariga curyaanku si aad iskaa isugu maamusho.

Hooygaaga aad hadda ku nooshahay waa inuu yahay mid aan habboonayn sababtoo ah:

- waxay u baahan tahay dib-u-habayn si aad ugu noolaato halkaas.
- ma laha meel uu mari karo gaariga curyaanku.
- waxay ka dhigaysaa xaallad caafimaad oo liidata mid ka sii darta.
- waxay aad uga fog tahay halka aad ka hesho daaweynta xaallad caafimaad oo liidata.

Xafiiska Guriyeyntu wuxuu ku weydiin doonaa caddaynta inaad u baahan tahay inaad ku noolaato meel gaar ah ama guri nooc ah (tusaale ahaan, warqadda dhakhtarkaaga). Xafiiska Guriyeynta ama hay'adda bulshada ee kuugu dhow ayaa ku siin kara faahfaahinta la xirriirta baahidaan (eeg halka ay ku taal **Kumaa Iga caawin kara?**).

Baahida Guriyeynta Gaarka ah (Special Housing Needs)

Guud ahaan, waxaad codsan kartaa qaybta Special Housing Needs (Baahida Guriyeynta Gaarka ah) haddii

- hooygaaga hadda jiraa uu yahay mid ku-meel-gaar ah, laguna weydiiyey inaad ka baxdo, ama
- aad khatar ugu jirto rabshada dagaal ama mid qoys, ama
- hooygaagu
  - guri qolal kaliya yahay ama caravan park oo adiga iyo qoyskaaguba aydan ka helayn tas-hiilaadkii wax karinta ama meelaha lagu mayrto.
  - kuu ogolaanayn inaad la noolaato carruurtaada baaxaddeeda ama meesha ay ku taal awgeed.

  - yahay mid cirriiri idiin ku ah oo aad ugu yaraan u baahan tihiin laba qol-jiif oo dheeraaad ah.
  - uu keenayo wadaagista qolalka jiifka oo aan habboonayn oo ay wadaagaan dadka kala jinsiga ah, halkaas oo ugu yaraan hal qof ka weyn yahay da'da lix sano ama halka ay waalidiintu la wadagaan carruurta jiifka.
- waxaad kaloo codsan kartaa haddii aad qabto jirro caafimaad oo aad u daran taas oo uu saamaynayo hooygaagu ama uusan ka jirin hooygaaga boos uu degi karo qof waqti-buuxa ku daryeela.

Haddii aadan hubin qaybta ku habboon baahidaada iyo duruufahaaga, weydii wixii talo ah Xafiiska Guriyeynta ama hay'adda bulshada ee kuugu dhow (eeg halka ay ku taal **Kumaa Iga caawin kara?**).

Maxaan samayn karaa ka-hor intaanan xarayn codsigayga?

Ka-hor intaadan ku xarayn codsigaaga Xafiiska Guriyeynta waa inaad:

- buuxisaa qaybaha foomka codsiga oo dhan, waxaadna ku xirtaa dokumentiyada lagama maarmaanka ah (tussaale, koobiga fiisadaada, warqadda dhakhligaaga ee Centrelink, qiimaynta caafimaad oo aad ka keento dhakhtarkaaga, wixii dokumenti kale ah oo caddaynaya inaad baahi degdeg ah u qabto guri).
- weydii shaqaalaha hay'adda bulshada inay kuu hubiyaan inaad si sax ah u buuxisey foomka codsiga aadna ku lifaaqday xogtii loo baahnaa oo dhan.
- Koobi garayso foomka codsiga aad soo buuxisey iyo dokumentiyada ku lifaaqan haddiiba uu lumo codsigaagu ama lagaa diido.

Maxaa dhacaya ka-dib markii aan xareeyo codsigayga?

Ka-dib markii aad xarayso codsigaaga, Xafiiska Guriyeynta ayaa warqad kuu soo diraya (badanaa 14 beri gudahood) si ay kuugu caddeeyaan helidda codsigaaga. Haddii aadan helin caddayntaas, la xirriir Xafiiska Guriyeynta.

Badiba codsiyada guryaha dadweynaha waxaa la fuliyaa asbuucyo yar gudahooda. Xafiiska Guriyeynta waa inuu si qoraal ah kuula socodsiiyaa go'aankooda. Haddii codsigaaga la ogolaado, Xafiiska Guriyeyntu wuxuu kugu darayaa liiska sugidda ama liisaska ay isku midka yihiin qaybta codsigaagu. Haddii aad beddesho cinwaankaaga ka-dib intii codsigaaga la ogolaaday, xusuuso inaad la socodsiiso Xafiiska Guriyeynta.

Maxaa dhacaya haddii codsigaygii la soo diido?

Waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aanka Xafiiska Guriyeynta haddii ay sameeyaan khalad ama aysan u hirgelin qorsheyaashooda si qumman. Ururka Kireysteyaasha (The Tenants Union) iyo hay'adaha kale ee bulshada ayaa kaa caawin kara sidii aad racfaan uga qaadan lahayd go'aanada Xafiiska Guriyeynta ama aad u xaraysan lahayd cabasho.

Waxaad kaloo xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo eexda. Xafiiska Guriyeyntu ma diidi karo codsigaaga ayagoo ku salaynaya xaalladda guurkaaga, cunsurkaaga, jinsigaaga, curyaanimada, jirrada, dookha galmada, ama citiqaad diineed ama siyaasadeed. Haddii aad rumaysan tahay in lagaa eexday, waxaad codsi u qoran kartaa Guddiga Fursadaha Loo Siman yahay (Equal Opportunity Commission) kuwaas oo ku siin karaa mag-dhow. Tenants Union iyo hay'adaha kale ee bulshada ayaa kaa caawin kara sidii aad codsi ugu dirsan lahayd Guddiga Fursadaha Loo Siman yahay.

Intee le'eg ayaan sugayaa in laygu siiyo Guryaha Dadweynaha?

Waqtiga sugiddu wuxuu ku xiran yahay nooca guriga iyo meesha aad soo codsatay. Tusaale ahaan, in laga helo hooyga dabaqa dhulka hoose ah magaala-weynta waxay qaadanaysaa in ka badan hooy la mid ah oo

laga helo xaafadaha darfaha magaalada ah. Waxaa kaloo waqti badan qaata in hooy la helo haddii aad soo codsatay guri afar qol-jiif ah ama in ka badan ah maaddaama ay guryahaas oo kale aad u yar yihiin.

Ayadoo ku xiran hadba xaaladdaada, waqtiga sugiddu wuxuu noqon karaa saddex bilood ilaa dhowr sano. Guud ahaan, dadka soo codsada Qaybta Guri-la'aanta Joogtada ah (Recurring Homelessness) ayaa ugu horreeya in la siiyo hooy. Waxaa ku xiga kuwa soo codsada Qaybta Hooyga la-Kaabo (Supported Housing), waxaana soo raaca Qaybta Baahida Guriyeynta Gaarka ah (Special Housing Needs). Haddii aad soo codsato Qaybta Sug-Tookada (Wait-Turn) waqtiga sugiddu wuxuu qaadan karaa dhowr sano.

Immisa ballan-qaad ayaan heli doonaa?

Haddii Xafiiska Guriyeyntu kugu daro liisaska sugidda ee Guri-la'aanta Joogtada ah (Recurring Homelessness), Hooyga-la-Kaabo (Supported Housing) iyo Baahida Guriyeynta Gaarka ah (Special Housing Needs), waxaad heli doontaa hal ballanqaad oo guri-siin ah. Haddii aad diido ballanqaadkaas waxaa isla markiiba lagugu darayaa liiska sugidda ee Sug-Tookada (Wait-Turn). Duruufaha qaarkood waxaad racfaan ka qaadan kartaa ballanqaad guri-siin ah haddii gurigu uusan lahayn baahiyahaaga caafimaad ama gaar ahaaneed.

Haddii aad diido ballanqaad kale ee liiska sugidda ee Sug-Tookada (Wait-Turn) waxaa lagaa saarayaa liisaska sugidda. Haddii markii horeba lagugu daray liiska sugidda ee Sug-Tookada waxaad heli doontaa laba ballanqaad ee guryaha dadweynaha ah.

Xafiiska Guriyeynta ayaa kuu soo diraya warqad laguugu sheegayo in guri diyaar yahay. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad ka soo jawaab-celiso ballanqaadka sida ugu dhakhsaha badanba. Xafiiska Guriyeyntu wuxuu kaloo ku weydiin doonaa haddii ay jireen wax is-beddello ah oo ku dhacay xaalladaadii ilaa iyo intii aad soo xaraysay codsigaaga.

Maxay yihiin xuquuqdayda iyo waajibaadyadayda markii aan noqdo Kireyste Guryaha dadweynaha?

Isla markiiba uu Xafiiska Guriyeyntu kuu qoondeeyo guri, waxaa lagaa codsanayaa inaad saxiixdo heshiis kiro ama ijaar. Kan waa heshiis sharci ah oo dhexmaray adiga iyo Xafiiska Guriyeynta. Haddii aadan fahmin dokumentigaas ama aad ka qabto wax su'aalo ah, la xirriir hay'adda bulshada ee kuugu dhow (eeg halka ay ku taal **Kumaa Iga caawin kara?**).

Isla markiiba aad saxiixdo heshiiska kirada, waxaad yeelanaysaa xuquuq iyo waajibaadyo la mid ah sida kireysteyaasha kale ee Victoria. (Tenants Union-ka ayaa ku siin kara daabacaad lacag la'aan ah oo kuu sharxaysa xuquuqdaan iyo waajibaadkaan).

Kumaa Iga caawin kara?

Adeegyadaan soo socda waa lacag la'aan, waana qarsoodi waxayna ka madaxbannaan yihiin Xafiiska Guriyeynta. Waxay aqoon fiican u leeyihiin codsiyada iyo kuwa bannaan ee guryaha dadweynaha, waxayna kaa caawin karaan sidii aad u buuxin lahayd codsiyada guryaha dadweynaha.

Adeegyada La-talinta ee Kireysteyaasha Guryaha Dadweynaha (Public Tenant Advice Service)

Adeegyada La-talinta ee Kireysteyaasha Guryaha Dadweynaha waxay talo kaa siin karaan xuquuqdaada sharci maaddaama aad tahay codsade guryaha dadweynaha. Waxay:

- kaa caawin karaan sidaad u buuxin lahayd foomamka codsiga guryaha dadweynaha.
- ku siin karaan faahfaahinta hadda ka jirta xadadka dakhliyada iyo raasumaalka ee guryaha dadweynaha

- kaa caawin karaan inaad racfaan ka qaadato go'aannada Xafiiska Guriyeynta.
- kaa caawin karaan haddii ay dhibaato kaa hayso Xafiiska Guriyeynta.
- kala hadli karaan kooxaha bulshadaada codsiyada guryaha dadweynaha.
- kuu diri karaan hay'adaha kale ee bulshada.

Tenants Union waxay ka mid tahay adeegyadaan. Waxaad kala xirriiri kartaa Tenants Union 9416 2577 ama waxaad furan kartaa web-site-ka (www.tuv.org.au), kaas oo kireysteyaasha siiya xog ku qoran 12 luqadood iyo faahfaahinta la-xirriirka hay'adaha bulshadu ee Victoria. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, ka wac Tenants Union Adeegga Telephone Interpreting Service oo ah 131 450.

Maamuleyaasha Guryaha Meel-dhaxmeedka ah (Transitional Housing Managers)

Maamuleyaasha Guryaha Meel-dhaxmeedka ah waxay siiyaan hooy xilli-meel-dhexaad ah

- qoysaska ama dadka kelida ah kuwaas oo guri-la' ama khatar ugu jira guri la'aan.
- haweenka iyo carruurtooda kuwaas oo ka soo carara rabshada qoyska.
- dadka dhallin-yarada ah (15-25 sano) kuwaas oo guri-la' ama ka soo carara rabshada qoyska.

Haddii lagu dejiyo guryaha ku-meel-gaarka ah, Maamulahaaga Guriga Ku-meel-gaarka ah ayaa kaa caawin kara inaad codsato guryaha dadweynaha qaybta Guri-la'aanta Joogtada ah (Recurring Homelessness).

Xaruumaha Xog-siinta Dadka Soo-galootiga ahs (Migrant Resource Centres)

Xaruumaha Xog-siinta Dadka Soo-galootiga ah waxay xog kugu siin karaan luqadaada oo ku saabsan adeegyada laga helo bulshadaada. Xarruumahaani waxay leeyihiin shaqaale ku hadla luqadaha aan ahayn Ingiriisiga. Si aad u hesho Xarrunta Xog-siinta Dadka Soo-galootiga ah ee kuugu dhow, waxaad ka hoos eegtaa meesha ay ku qoran tahay Organisation/Migrant ee buugga taleefoonada L-Z Yellow Pages telephone directory.